

# CHÈQUE famille

Akhbaar wanaagsan! Dawlada hoose ee Vernier waxay go'aansatay inay kordhiso lacagta jeegaga la siiyo qoysaska oo ahaa CHF 100 lagana dhigo CHF 150 si ay kaaga caawiso inaad uga bixiso hal, labo ama saddex hawlood oo nashaad ah ilmahaaga (ciyaaraha, qoob ka ciyaarka, xiisadaha ardayda lagu luqadda, kambaaska maalinta iwm.).

## Jeegaga qoyska: Sidee ayay u shaqeeyaan?

Maxay yihiin?

Waxaad heli doontaa CHF 150.00 si ay kaaga caawiso inaad uga bixiso hal, labo ama saddex hawlood oo nashaad ah ilmahaaga (ciyaaraha, qoob ka ciyaarka, xiisadaha ardayda lagu luqadda, kambaaska maalinta iwm.). Ilmo kasta waxuu heli doonaa saddex jeegaga qoyska oo mid kastana uu yahay CHF 50.

Yaa heli doona jeegaga qoyska?

Ilma kasta oo ku nool Vernier kana diwaangeshan dugsiga hoose ama wareega tilmaan siinta.

Goorma ayaan heli doona jeegaga qoyska?

Waxaad ku heli doona jeegaga qoyska boostada:

- inta lagu jiro bisha Agoosto haddii ilmahaaga laga diwaangeliyay dugsi dawladu maamusho.
- inta lagu jiro bisha Janaayo haddii ilmahaaga laga diwaangeliyay dugsi shaqsi uu leeyahay.

Waxaad isticmaali kartaa jeegaga qoyska ilaa iyo 17 Agoosto 2025.

Sideem u isticmaali karaa jeegaga qoyska?

- Sii jeegaga qoyska qofka mas'uulka ka ah hawlaha madadaalada leh. Waxay ku xaqiijin doonaan iyaga oo iskaan marinayo QR koodka.
- Jeega qoys kasta waa mid qofka gaar u ah loomana wareejin karo ilmo kale oo qoyska ka tirsan. Waxaa lagu xaqiijin doonaa marka lala soo bandhigo warqadda aqoonsiga.

Waxaad u isticmaali kartaa

- inaad hal hawl ku bixiso saddex jeeg;
- inaad hal jeeg ku bixisid hal hawl labada jeeg ee kalana aad ku bixid hawl labaad oo tii hore ka duwan;
- inaad saddexda jeed ku bixiso saddex hawl oo kala duwan.

Halkee ayaa lagu isticmaali karaa jeegaga qoyska?

- Jeegaga qoyska waxa gudaha Vernier looga isticmaali karaa hawl madadaalo.
- Haddii ilmahaagu uu rabo hawl madadaalo oo lagu bixinin Vernier, weydii qofka hawsha gacanta ku haya haddii jeega qoysku ku shaqaynayo hawsha.
- Jeegaga qoyska looma isticmaali karo in lagu bixiyo daryeelka ka danbeeya saacadaha dugsige ee GIAP [Inter-commune Group for After-school Activities].

Sidee ayaan u heli karaa hawl madadaalo oo ilmahaygu rabo?

- Ka fiiri buug-yaraha Hawlaha Dhalinyarada: [www.vernier.ch/activitesjeunesse](http://www.vernier.ch/activitesjeunesse)
- Websaydka jeegaga qoyska

Ma u baahan tahay caawimaad?

Naga soo wac 022 306 06 80.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan websaydka Dawlada hoose ee Vernier: [www.vernier.ch/chequefamille](http://www.vernier.ch/chequefamille)

